



## **Dugsiga Hoose ee Cesar Chavez oo qabtay Wax akhris iyada oo qayb ah Bisha Taariikhda Dadka Madow**

Iyada oo qayb ka ah Dabaaldega Bisha Taariikhda Dadka Madow, Dugsiga Hoose ee Cesar Chavez wuxuu qabtay Wax akhriska Maraykanka Madow, Febraayo 15. Ku dhawaad 200 oo qof, oo ay ka mid yihiin hoggaamiyeyaasha bulshada iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland, ayaa yimid dugsiga si ay ugu ardayda ugu akhriyaan buugaag ay qoreen dad madow ama ka hadlaysa geesiyasha Maraykanka Madow.

“Waxaa sharaf inoo ah in hoggaamiyeyaal badan oo bulshada ka tirsan ay u soo baxeen in ay taageeraan dugsigeena,” ayuu sheegay T.J. Fuller, Maamulaha Cesar Chavez. “Waxaanu yeelanay oo jiray dad badan oo isku soo baxay wayna wanaagsanayd in la arko dad badan oo ka mid ah bulshadeena oo ay ka go’an tahay inay la shaqeeyaan ardaydeena.”